

Waxaad heli karta talobixin
Isniinta ilaa Jimcaha 9 -14 saac

Danish iyo Ingiriis

T 33 73 50 00

Nambaradan ku xiga waxaad ka heli kartaa talobixin afafka daanishka iyo
luqadaha

Bosniya / serbiga / kroatiga

T 33 73 52 33

Carabiga iyo kurdiga (sorani)

T 33 73 52 28

Somaali

33 73 53 11

Hadii aad doonayso talo bixin gooni ah oo ku saabsan xuquuqdaada la xiriirta
ku noqoshada waddankaaga soo buuxi warqdda macluumaadkaaga taas oo
aad ka helayso bogeenka internetka

www.atvendehjem.dk

Ama qoraal waad noogu soo diri kartaa

atvendehjem@drc.ngo



DIB U NOQOSHADA 2021

Warbixin ku socota qaxootiga iyo soogalootiga
Kuna saabsan qofka doonaya inuu iskii ugu laabto waddankiisii

HADII AAD KU FAKARAYSO IN AAD DIB UGU LAABATO WADDANKAAGII

Hayadda gargaarka qaxootigu waxay ugu yaboohaysaa Qaxootiga iyo soogalootiga talobixin ku saabsan dib u noqoshada. Waxaan ka shaqynaynaa sidii aan xal waara ugu heli lahayn dhibaatada qaxootiga ee Danmark iyo aduunka intiisa kalaba.

KAALMADA DHAQAALE

2021 ka waxaa uu qofka wayni heleyaa 144.900 kr. si uu nolol cusub uga bilawdo wadankiisa. Caruurtuna waxay helayaan 44.193 kr. ilmihiiiba.

Lacagta waxaa la bixinayaa 2 qaybood - qaybta u horaysa waxaa labixinayaa marka uu qofku dhoofayo (57.959 kr. qofka wayn, ilmahana 17.677 kr.) qaybta labaad (86.941kr. qofka wayn, ilmahana 26.516 kr.) waxaa la bixinayaa sanad ka dib, qofkuna joogo wadankiisa.

KAALMOOYINKA KALE EE UU QOFKU HELAYO

- Kharashka dhoofitaanka
- Kharashka rarka alaabataada ama inaad dalbato lacag aad adigu alaab guri ku gadato.
- Qalab meheradeed iyo in lagu raro.
- Caymis caafimaad/ kharasha daawaynta 4 sano ah
- Daawada aad isticmaasho 1 sano
- Qalab aad caafimaad ahaan u isticmaasho
- Kharashka iskuulka Caruurta jirta 5-16 sano
- Kharashka waraaqaha/Baasaboorka aad ku dhoofaysid

DRC DANSK
DRC FLYGTNINGE
DRC HJÆLP
HADII 55 SANO AAD BUUXISAY

Hadii ugu yaraan jirto 55 sano oo aad rabto in aad ku noqoto wadankaagii, waxaad leedahay Kaalmo joogta ah oo ay Danmark bil walba ku siinayso.

Kaalmadaasu caadiyan waxay u dhaxaysaa 2.800 iyo 4.500 kr. bil walba. Si aad taas u hesho waa inaad Danmark ugu yaraan 5 sano sharci ku lahayd.

XAQ U LAHAANSHAHA KA NOQOSHADA

Qaxootigu xaq ayay u leeyihiin in ay ka noqdaan go`aanka noqoshada oo ay ku soo noqdaan Danmark 1 sano gudiheed. Taas micneheeda waxay tahay soo cesashada degenashaha aad Danmark hore ugu lahayd. Hadii aad dalbato inaad goaankaaga ka noqoto ood dalka Danmark ku soo noqoto, waa in aad soo celisaa wixi caawimaad ahaa ee lagu siiyay.

Soogalayti xaq uma laha in ay ka noqdaan go`aanka noqoshada mar hadii ay ka dhoofaan Danmark oo ay qaataan kaalmada ku noqoshada wadankooda. Taas maceneheeda waxay tahay in ay waayayaan xaquuqdii ay Danmark ku lahaayeen oo aynan Danmark dib ugu soo noqon doonin.

Labada dhalasho waa in aad qayb ahaan celisid baasaboorka daanishka ah intaanad dhoofin. Waxa kuu suurtoagal ah in aad ka noqotid go`aanka aad baasaboorka ku celinaysid mudo labo sano gudohood. Haddii aad ka laabato dib unoqoshada, waa in aad bixisaa kaalamdii lagu siiyay oo dhan.

HADAAD DOONAYSO FAAHFAAHIN DHEERI AH

Hadii aad ku fakarayso inaad wadankaagii ku noqoto, waxaad noo soo diri kartaa foomka warbixintaada, taas oo aad ka helayso bogeena internetka (websites keena), wada hadal gooni ah oo aan kula yeelano waxaan kuugu faahfaahin doonaa fursadaha iyo xuuquuda aad leedahay si aad u gaadho go`aanka kugu haboon. Waxaan ku dadaalaynaa in lagu qabto turjumaan hadii aad ubaahantahay.